

PL514 (Rev 1)

Fasaxa waalidnimo iyo lacag bixintiisa

Qoraal kooban oo Aasaasi ah

Dowladda waxaa ka go'an in ay caawiso waalidiinta shaqeeya, **xuquuqaha fasaxa waalidnimo iyo lacag bixintooda ayaa la soo saaray taasoo ay helayaan shaqaalaha la filayo in ilmahoodu dhasho ama ay dhasheen 6da Abriil 2003 ama ka dib.**

Islamarkaas, Dowladdu waxay kordhineysaa fasaxa umulaha iyo lacag bixintooda, iyadoo la soo saarayo xuquuqaha mushaarka inta fasaxa lagu jiro la bixiyo ee waalidiinta ilmo (aysan dhalin) koriya (paid leave for adoptive parents), iyo xaqa waalidiinta ilmaha yar yar haystaa u leeyihiin inay codsadaan shaqo la badbadali karo. Xuquuqahaan, oo ay la socdaan xuquuqaha fasaxa waalidka iyo fasaxa gaaban ee loogu talo galay lagu-tiirsanayaasha, waxay siinayaan waalidka fursado badan oo aan hore u jirin si laysugu dheelitiro shaqada iyo nolosha qoyska iyadoo islamarkaana lala soconayo dhamaystirka iyo waxtarka tayada shaqooyinka iyo ganacsigaba.

Buugyarahani wuxuu bixinayaa warbixin aasaasi ah oo ku saabsan xuquuqaha fasax waalidnimo iyo lacag bixintooda. Buugyarahani iskuma dayi doono in uu faahfaahin aad u ballaaran bixiyo, waana in aan loo qaadan in uu buugyarahani yahay bayaan awood sharci fulineed.

Fasax waalidnimo iyo lacag bixin waxaa kaloo heli kara shaqaalaha ka dib marka lagu soo meeleeyo ilmo (aysan dhalin) si ay u koriyaan. Eeg buugyaraha *waalidiinta ilmo (aysan dhalin) koriya - xuquuqaha fasax iyo lacag bixinta* (PL 515) (*Adoptive parents - rights to leave and pay* (PL515)) wixii faahfaahin dheeraad ah (waxaa laga helayaa cinwaanka internetka oo ah www.dti.gov.uk/er/individual/adopt-pl515.htm ama Khadka dalbashada qoraallada ee (DTI Publications Orderline) - faahfaahinta la xiriiritaanka waxaa lagu daray qaybta: Warbixin Dheeraad ah).

Qoraalkii ugu dambeeyey ee buugyarahan iyo hagitaan faahfaahsan ee ku saabsan *Aabayaasha shaqeeya - xuquuqaha fasaxa iyo lacag bixinta* (PL 517) (*Working fathers - rights to leave and pay* (PL 517) ayaa laga heli karaa shabakada internetka cinwaankuna waa www.dti.gov.uk/er/paternity.htm ama Khadka-dalbashada Qoraallada ee (DTI Publications Orderline) (faahfaahinta la xiriiritaanka waxaa lagu daray qaybta: Warbixin Dheeraad ah) Wixii Warbixin dheeraad ah ee arrimaha xiriirrada shaqada eeg cinwaanka shabakadaan www.dti.gov.uk/er.

Feberwari 2003

Fasaxa waalidnimo iyo lacag bixinta **(Paternity leave and pay)**

Ka dib markuu ilmo dhasho, xuquuqaha fasaxa waalidnimo iyo lacag bixintu waxay siinayaan shaqaalaha xaq ah inay helaan fasax ay mushaarkooda qaadanayaan si ay u daryeelaan ilmaha ama ay u taageeraan hooyada.

Taariikhda Bilowga

Shaqaalaha filaya in ay ilmahoodu dhashaan 6da Abriil 2003 ama wixii ka dambeeya way ka faaiidaysanayaan habka cusub ee fasaxa waalidnimo iyo lacag bixinta.

Shaqaalaha filaya in ay ilmahoodu dhashaan 6da Abriil 2003 ama wixii ka dambeeya waxay qaadan karaan fasax waalidnimo iyo lacag bixin xataa haddii ilmahoodu dhasho ka hor waqtigii la filayey.

Shaqaalaha filaya inay ilmahoodu dhashaan ka hor 6da Abriil 2003 laakiin ilmahoodu dhasheen ka dib waqtigii la filayey ama ka dib 6da Abriil 2003 waxay qaadan karaan fasax waalidnimo iyo lacag bixin (ogeysiin habaysan oo gaar ah ayaa la dabbaqayaa).

Xaq u yeelasho (Eligibility)

Shaqaalaha waa in ay soo buuxiyaan shuruudaha soo socda si ay u helaan fasax waalidnimo. Waa inay -

- leeyihiin ama ay rajeynayaan inay yeeshaan mas'uuliyadda korinta ilmaha
- noqdaan aabaha dhabta ah ee ilmaha ama ninka qaba hooyada ama lammaane
- u shaqeeyeen loo-shaqeeyahooda si isdabajoog ah muddo 26 asbuuc oo buuxsamaya asbuuca shan iyo tobnaad ee ka horreeya waqtiga la filayo dhalshada ilmaha

Loo-shaqeeyayaashu waxay weydiisan karaan shaqaalahooda inay keenaan shahaado-qofahaaneed (eeg xagga hoose si aad u hesho faahfaahin dheeraad ah) si ay u cadeeyaan in ay soo buuxinayaan sharuudahaan xaq u yeelashada.

Muddada fasaxa waalidnimo

Shaqaalaha xaq u yeesha waxay kala dooran karaan inay qaataan hal asbuuc ama laba asbuuc oo isku xiga oo fasax waalidnimo ah (lama ogola maalmo kinsi ah).

Waxay dooran karaan in fasaxoodu bilowdo -

- taariikhda ilmuhu dhashaan (ama ha ka horreyso ama ha ka dambeyso waqtigii la filayey) ama
- maalmo ama asbuucyo cayiman oo la doortay ka dib dhalashada ilmaha (ama ha ka horreyso ama ha ka dambeyso waqtigii la filayey) ama
- taariikh la doortay oo ka dambeysa maalinta ugu horreysa asbuuca la filayo in ilmuhu dhasho.

Fasuxu wuxuu billaaban karaa maalin kasta ee ka mid ah asbuuca oo ku beegan ama ku xigta maalinta dhalashada ilmaha laakiin waa in uu dhammaadaa -

- 56 maalmood gudohood marka laga bilaabo taariikhda xaqiiqda ah ee dhalashada ilmaha, ama
- haddii ilmuhu goor hore dhasho, inta lagu jiro muddada laga soo billaabo taariikhda xaqiiqda ah ee dhalashada ilmaha illaa maalinta 56-aad ka dib maalinta ugu horreysa ee asbuuca la filayey dhalashada ilmaha.

Muddo fasaxeed qudha ayaa la siinayaa shaqaalaha iyadoon loo eegeyn tirada ilmaha ku dhasha hal uur oo kali ah.

Xeerka Lacag bixinta Waalidnimada (Statutory Paternity Pay)

Muddada ay ku jiraan fasaxooda waalidnimo, shaqaalaha intooda badani waxay xaq u leeyihiin Xeerka Lacag bixinta Waalidnimada (Statutory Paternity Pay (SPP)) oo ay ka helayaan loo-shaqeeyahooda.

Xeerka Lacag-bixinta waalidnimada (Statutory Paternity Pay (SPP)) waxaa bixiya loo-shaqeeyayaasha 1 asbuuc ama 2 asbuuc oo xiriir ah hadba sida shaqeeyuhu uu doorto. Heerka Xeerka Lacag bixinta Waalidnimo (SPP) wuxuu la mid yahay heerka Xeerka Lacag-bixinta Umulaha - laga billaabo Abriil 2003, waxay noqon doontaa £100 asbuucii ama 90% celceliska dakhliga kasbashada asbuuc kasta haddii ay ka hooseyso £100 asbuucii.

Muddo kasta oo lacag bixin waalidnimo ah oo ka horreysay 6da Abriil 2003 waxaa loo bixinayaa mudadaas oo dhan heerka caadiga ah ee la midka ah midda Xeerka Lacag-bixinta umulaha laga soo billaabo Abriil 2002 - £75 asbuucii.

Shaqaalaha qaata asbuucii celcelis kasbasho ah oo ka hooseeya Xadka Hoose ee kasbashada (Lower Earnings Limit) ee hadafka Caymiska Qaranka (National Insurance) (£75 asbuucii laga billaabo 2002) xaq uma laha in la siiyo SPP. Shaqaalaha aan xaq u yeelan in la siiyo SPP, ama kuwa sida caadiga dakhligoodu yar yahay, waxaa suuro gal ah inay helaan Kaalmo Dakhli (Income Support) inta ay ku jiraan fasaxa waalidnimo. Taageero dhaqaale oo dheeraad ah ayaa lagu heli karaa gunnoyinka Kaalmo guriyeyn (Housing Benefit), Kaalmo Canshuur Dowlad Hoose (Council Tax Benefit), Lacago Canshuur (Tax Credits) ama Deeq Hooyonimo ee Bilowga la Hubo (a Sure Start Maternity Grant). faahfaahin dheeraad ah waxaa laga helayaa Xarunta Shaqo-bixin Dheeraad ee xaafaddaada (Jobcentre Plus) ama xafiiska Badbaadada Bulshada (Social Security office).

Ogeysiin rabid fasax waalidnimo

Shaqaaluhu waa inay ogeysiiyaan loo-shaqeeyahooda inay qaadanayaan fasax waalidnimo dhammaadka asbuuca shan iyo tobnaad ee ka horreeya asbuuca la filayo dhalashada ilmaha, in arrintaani macquul noqon weydo mooyee. Waa inay u sheegaan loo-shaqeeyahooda:

- asbuuca la filayo ilmaha
- haddii ay doonayaan inay qaataan fasax 1 asbuuc ama 2 asbuuc ah
- waqtiga ay doonayaan in fasaxoodu bilowdo

Shaqaaluhu way bedeli karaan maskaxdooda marka la eego goorta ay doonayaan inuu bilowdo fasaxoodu laakiin waa inay la socodsiiyaan loo-shaqeeyahooda ugu yaraan 28 maalmood ka hor inta aan fasaxa la gelin (in arrintaani macquul noqon weydo mooyee). Shaqaaluhu waa inay u sheegaan loo-shaqeeyayaashooda taariikhda ay filayaan in ay bilaabato wax alle iyo wixii ah lacag bixin SPP ah ugu yaraan 28 maalmood ka hor intaan fasaxa la gelin (in arrintaani macquul noqon weydo mooyee).

Shahaado Qof-ahaaneed

Shaqaaluhu waa inay siiyaan loo-shaqeeyayaashooda shahaado-qofahaaneed si ay u cadeeyaan inay xaq u leeyihiin SPP. Tusaale shahaado-qofahaaneed loogu talagalay loo-shaqeeyayaasha iyo shaqaaluhu ay isticmaalaan (hadday rabaan inay sidaas sameeyaan) ayaa dib loogu soo daabacay buugyaraha lagu magacaabo *Aabayaasha shaqeeya - xuquuqaha fasaxa iyo lacag bixinta* (PL 517) (Working fathers - rights to leave and pay (PL 517) kuwaas oo laga helayo shabakada internetka cinwaankuna waa www.dti.gov.uk/er/paternity.htm ama Khadka-dalbashada qoraallada ee (DTI Publications Orderline) (faahfaahin la xiriiirtaanka waxaa lagu daray qaybta: Warbixin Dheeraad ah). Loo-shaqeeyayaasha waxay sidoo kale codsan karaan shahaado qof-ahaaneed oo dhameystiran iyagoo caddeyn uga dhigaya xaq u yeelashada fasax waalidnimo.

Shahaadada qofahaaneed waa inay ka mid tahay shaac-ka-qaadis (declaration) in shaqeeyuhu buuxiyo shuruudo gaar ah oo uu xaq ugu yeelanayo iyo inuu dhiibo macluumaadka kor lagu soo qeexay oo ka mid ah codsiyada ogeysiiska.

Markay dhiibaan shahaado qofahaaneed oo dhameystiran, shaqaaluhu waxay buuxiyeen ogeysiiska iyo sharuudaha cadeynta ee fasaxa waalidnimo iyo lacag-bixintaba. Lagama filayo in loo shaqeeyayaashu ay ku dhaqaaqaan wax dambe oo baaritaan ah.

Dheefta Heshiis-gelidda (Contractual Benefits)

Shaqaaluhu waxay xaq u leeyihiin dheefta heshiisyada caadiga ah iyo shuruudaha shaqada dhammaan inta ay ku jiraan fasaxooda waalidnimo, marka laga reebo heshiisyada la xiriira mushaarka todobaadlaha iyo mushaarka billaha (haddii uusan heshiiskooda shaqo sheegayn wax sidaa ka duwan). Si kastaba ha ahaatee, shaqaalaha intooda badan waxay muddadaan xaq u yeelan doonaan inay helaan SPP. Haddii shaqeeyuhu haysto xaq ah heshiis-gelid fasax waalidnimo sidoo kalena xaq xeer ahaan ah, waxaa suurto ah inuu ka faa'iideysto mudda uu labadooda door bidayo. Lacag-bixin kasta oo waalidnimo oo uu ku helay xaq heshiis-gelidda waxay hoos u dhigeysaa tirada lacagta SPP ee uu xaq u yeelanayo.

Shaqo ku noqoshada ka dib fasaxa waalidnimo

Shaqaaluhu waxay xaq u leeyihiin inay dib ugu noqdaan isla shaqadii ay hayeen ka dib marka ay ka soo noqdaan fasaxa waalidnimo.

Ka tabaabushaysi waxyeello iyo ruqsayn (Protection from detriment and dismissal)

Shaqaalaha waxaa laga ilaaliyay dhibaato kaga timaada in loola dhaqmo si aan cadaalad ahayn ama ruqsayn ku timaada ka dib qaadashada ama doonista in ay qaataan fasax waalidnimo. Shaqaalaha rumeysan in loola dhaqmay si aan cadaalad ahayn waxay u dacwoon karaan maxkamadda gaarka ah ee shaqada (employment tribunal).

Dib u soo ceshiga lacagat ay loo-shaqeeyayaashu bixiyeen (Employers' recovery of payments)

Loo-shaqeeyayaashu waxay dib ugu soo ceshan karaan qiimaha lacagta ay ku bixiyeen Xeerka Lacag-bixinta waalidnimo (SPP) si la mid ah sida ay ugu dacwoon karaan in dib loogu soo celiyo lacagaha Xeerka Lacag-bixinta umulaha. Loo-shaqeeyayaashu waxay dib ugu dacwoon karaan 92% lacagihii ay bixiyeen, kuwa iyagu xaq u leh gargaar yar ee loo-shaqeeyayaal (small employers' relief) waxay u dacwoon karaan 100% oo lagu daray qiimaha dheeriga ah ee magdhawga qaybtii loo-shaqeeyuhu ugu tabarucay Caymiska Qaranka (National Insurance) ee uu ka bixiyey SPP da.

Waxaa intaa dheer, loo-shaqeeyayaasha u baahani waxey hormaris maalgilined ee lacagtii SPP da ka heli karaan Xafiiska Canshuuraha (Inland Revenue).

Xuquuqaha kale ee u dabacsan Qoysaska **(Other Family Friendly Rights)**

Xaqa Codsashada shaqo la badbadali karo

Waxaa la soo saaray xaqa ay ku codsanayaan shaqo la badbadali karo waalidka haya ilmo da' yar ama naafo ah. Laga bilaabo 6da Abriil 2003 shaqaalaha xaqa u leh, kuwaasoo ah waalidiin ay da'da carruurtoodu ka hooseyso lix sano, ama haya carruur naafo ah oo da'doodu ka hooseysa sideed iyo toban sano, waxay heli doonaan xaqa ay ku dalbanayaan shaqo la badbadali karo. Loo-shaqeeyayaashooda waxaa waajib ku ah in ay si dhab ah u tixgeliyaan codsiyada noocaan oo kale ah.

Buugyare bixinaya warbixin aasaasi ah oo ku saabsan *Shaqayn la badbadali karo -xaqa aad u leedahay inaad codsato (PL516) (Flexible working - the right to apply (PL516)* ayaa laga helaa cinwaankan internetka oo ah www.dti.gov.uk/er/individual-pl516.htm ama Khadka-dalbashada Qoraallada ee (DTI Publications Orderline) (faahfaahinta la xiriiitaanka waxaa lagu daray qaybta: Warbixin Dheeraad ah).

Isbeddello ku dhacay xuquuqda umulaha (Changes to maternity rights)

Xuquuqaha hadda jira ee umulaha waa la bedelay si loo dheereeyo muddada fasaxa umulaha iyo lacag-bixintaba loona kordhiyo heerka lacag-bixinta umulaha. Dumarka asbuuca umusheeda la filayo in uu ka billaabanayo maalinta 6da Abriil 2003 ama ka dib way ka faa'iidayaan xuquuqaha cusub ee fasaxa umulaha iyo lacag-bixintaba.

Buugyare bixinaya warbixin aasaasi ah oo ku saabsan *Fasaxa Umulaha - isbeddello (PL507) (Maternity leave - changes (PL507)* iyo hage dhamaystiran oo ah xuquuqihii hore ee umulaha iyo kuwa cusub labadaba - - labada daabacadood ee buugyaraha *Xuquuqaha umulaha - hage loogu talagalay loo-shaqeeyayaasha iyo shaqaalaha (PL958) (Maternity rights - a guide for employers and employees (PL958))* ayaa laga helaa cinwaankan internetka oo ah www.dti.gov.uk/er/maternity.htm. Buugyarahaan waxaa sidoo kale laga helaa Khadka-dalbashada Qoraallada ee (DTI Publications Orderline) (faahfaahinta la xiriiitaanka waxaa lagu daray qaybta: Warbixin Dheeraad ah).

Xuquuqaha fasaxa mushaarka waalidiinta ilmo (aysan dhalin) koriya

Waxaa la soo saaray Xaqaa fasax ilmo (aan la dhalin) korintooda iyo lacag bixintooda. Xaqaa waxaa helaya shakhsiyaadka qaaday mas'uuliyad ilmo korin, ama mid ka mida laba qof oo wada nool oo si wadaag ah ilmo u koriya.

Xaqaa fasax wwalidnimo iyo lacag bixin ee loogu talo galay qofka kale ee dadka wada nool, ama ninka/xaaska ama lammaanaha qofka ilmaha koriya, ayaa sidoo kale la soo saaray. Shaqaalaha carruurtooda lagu meeleyay yihiin 6da Abriil 2003 ama ka dib waxay ka faa'iidaya xuuqahan ilmo korin iyo fasax waalidnimo iyo lacag bixin.

Buugyare kaa siinaya macluumaad asaasi ah *Waalid ilmo (uusan dhalin) koriya - xuuqaha fasaxa iyo lacag bixinta (Adoptive parents - rights to leave and pay (PL515))* ayaa laga helaa cinwaanka shabakadda oo ah www.dti.gov.uk/er/individual/adopt-pl515regs.htm ama Khadka-dalbashada Qoraallada ee (DTI Publications Orderline) (faahfaahin la xiriirtaanka waxaa lagu daray qaybta: Warbixin Dheeraad ah).

Xuuqaha fasaxa waalidnimo iyo fasaxa gaaban ee lagu-tiirsanayaasha

Shaqaalaha - aabayaasha iyo hooyooyinkaba - kuwaasoo u shaqeynayay muddo sannad ah loo-shaqeeyohooda, waxay xaq u leeyihiin 13 asbuuc (oo mushaar la'aan ah) oo fasax waalidnimo ah si ay u daryeelaan ilmahooda. Fasaxa waalidnimo waxaa sida caadiga ah la qaadan karaa ilaa iyo 5 sano laga billaabo taariikhda dhalashada, ama marka la eego xaaladaha ilmo (aan la dhalin) korintooda shan sano laga billaabo taariikhda meeleynta (ama sannadguurada 18aad ee dhalashada ilmaha, haddii taasi dhowdahay).

Waalidiinta carruurta naafada ah waxay xaq u leeyihiin 18 asbuuc oo ah fasax waalidnimo (hore waxay u ahayd 13 asbuuc) illaa marka ilmuhu gaaro sannadguurada 18aad, waase haddii ay haystaan muddada shaqo ee arrintaas lagu gaaro.

Dhammaan shaqaaluhu waxay kaloo xaq u leeyihiin inay qaataan ilaa heer fasaxyo gaagaaban ah (mushaar la'aan ah) oo macquul ah si ay wax uga qabtaan xaaladaha degdegga ah ama xaaladaha aan la fileyn ee ku-tiirsanayaashooda.

Hagitaan buuxa oo ku saabsan *Fasaxa waalidnimo (Parental leave (PL509))* iyo *Fasaxa Gaaban lagu-tiirsanayaasha (Time off for dependants)* (URN 99/1186) ayaa laga helaa www.dti.gov.uk/er/regs.htm ama Khadka-dalbashada Qoraallada ee (DTI Publications Orderline) (faahfaahinta la xiriirtaanka waxaa lagu daray qaybta: Warbixin Dheeraad ah).

Faahfaahin dheeraad ah

- Shaqaalaha iyo loo-shaqeeyayaasha labadaba way isticmaali karaan bogga hagidda iskudhafan oo ah (www.tiger.gov.uk) si ay u ogaadaan xuquuqaha ku wajahan fasaxa waalidnimo iyo kan umulaha iyo lacag bixintoodaba.
- Buugyarayaasha hagitaan ee lagu soo sheegay buugyarahan waxaa laga helayaa Khadka-dalbashada Qoraallada (DTI Publications Orderline) oo ah 0870 1502 500 ama waxaa laga dalban karaa internetka cinwaanka www.dti.gov.uk/publications
- Loo-shaqeeyayaashu waxay faahfaahin dheeraad ah oo SPP da ku saabsan ka heli karaan Xafiiska Canshuuraha (Inland Revenue) cinwaanka internetku waa:
(www.inlandrevenue.gov.uk/employers) kuwaasoo soo saara buug-gacmeed loo-shaqeeyayaasha loogu tala galay oo la yiraahdo E15 Lacag-bixinta iyo fasaxa gaaban ee waalidiinta (employer's helpbook E15 Pay and time-off work for parents) (nuqulkiisa waxaa lagu helaa soo wicista 08457 646 646). Caawimaad dheeraad ah, loo-shaqeeyayaasha waxay soo wici karaan khadka caawinta loo-shaqeeyayaasha oo ah 0845 714 3143.
- Talo bixin dheeraad ah oo arrimaha sharciyada shaqada ku saabsan, oo ay ka mid tahay xuquuqaha cusub, iyo waliba ku dhaqanka hagitaanka wanaagsan waxaa laga helaa ACAS (www.acas.org.uk) adoo wacaaya Khadkooda-caawinta Qaranka ee (08457 474747)
- Ganacsatada yaryar waxay iska diiwaangelin karaan cinwaanka internetka oo ah www.businesslink.org si ay u helaan warqado xusuusin iyo isbedelada u dambeeyey ee ku dhaca sharciga shaqada. Sidoo kale waxaa la helaa macluumaad dheeraad ah oo ka hadlaya caawimaad balaaran oo nooc kasta leh looguna talo galay ganacsatada yaryar.
- Macluumaad ku saabsan dhammaan qaababka sharci-dejinta shaqada ayaa sida caadiga ah ay bixiyaan xisaabiyayaasha, xarumaha talo siinta muwaadiniinta (citizen advice bureaux) ururrada loo-shaqeeyayaasha, talo bixiyayaasha sharciga (legal advisers), waaxaha mushaarooyinka hoose (low pay units), ururrada shaqaalaha (trade unions) iyo qaar ka mid ah ganacsatada gaarka ah (private sector) iyo ururrada iskaa-wax-u-qabso (voluntary bodies).